Kuma anaan tirin jirin boora-boorowga iyo jaalaha waxba markaan daahirsano ka dib

Umu Cadiya -Allaha ka raali ahaadee- waxay la mubaayacootay Nabiga -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee-, waxayna tiri: Kuma anaan tirin jirin boora-boorowga iyo jaalaha waxba markaan daahirsano ka dib.

[Xadiis Saxiix ah] [رواه أبو داود بهذا اللفظ ورواه البخاري بدون زيادة (بعد الطهر)]

Saxaabiyada Umu Cadiya -Allaha ka raali ahaadee-, waxay sheegtay in haweenku waqtigii Nabiga-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- aanay waxba ka soo qaadi jirin biyaha ka yimaada farjiga, kaasoo midabkiisu u eg yahay madow, ama jaale, marka xaydka laga daahir noqodo: looma arki jirin xayd, ugamana tagi jirin isaga salaada iyo soonka.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/10014